

Umulisadeyda Malmö waa moodel daryeel caafimaad ah oo cusub laguuguna tala galay haddii aad tahay qof uur leh, deggan magaalada Malmö iska markaana u baahan xasillooni dheeri ah inta lagu jiro waqtiga uurka, foosha iyo daryeelka foosha kadib.

Ka hor

Umulisadeyda waxaa loo hirgelinayaa qaab mashruuc ah oo muddo seddax sano ah ka soconayo isbitaalka Skånes universitetssjukhus ee ku yaal Malmö. Moodelka daryeelka waxaa loogu tala galay dumarka:

- Qaba baqdin fool
- Qaba welwel iyo walbahaar
- Aanan ku hadlin luqadda iswiidhishka ama ingiriiska isla markaana cunuggooda ugu horreeya ku dhalaya Iswiidhan (dhici karta in ay carruur ku dhaleen waddamo kale)

Inta laga gaarayo isbuuca 20 ee uurka waxay masuuliyadda koowaad saarantahay waaxaha umulisooyinka ee xarumaha daryeelka koowaad marka aad uurka leedahay. Waxaad isku qori kartaa xarunta daryeel ee caafimaad ee aad rabto mid gaar loo leeyahay ama mid kale.

Haddii aad ka mid tahay guruubyada mid ka mid ah waxaa jira qaabab kala duwan oo looga qeyb qaato moodelka daryeelka (vårdmodellen). Waxaa go'aaminaya xarunta foosha ee Umulisadeyda Malmö inaan ka qeyb geli karo.

Adiga oo u maraya xarunta caafimaad ee umulisada

Adiga iyo umulisadaada ayaa si wada jir ah uga hadlaya baahidaada iyo haddii aad rabto in aad ka qeyb qaadato moodelka daryeelka. Haddii aad ka mid tahay guruubyada mid ka mid ah umulisada ayaa waxey jawaab u diri kartaa isbitaalka Malmö qeybtiisa foosha.

Iskaa u dalbasha daryeel caafimaad

Haddii aad ka mid tahay guruubyada mid ka mid ah, isla adiga kaligaa ayaa su'aal diri kartid, su'aashaas oo loo yaqaan iskaa u dalbasha daryeel caafimaad adiga oo ka dalbanaya 1177.se (länk dit). Waxaad kale oo iskaa u dalbasha daryeel caafimaad ka smaeyn kartaa adiga oo wacaya isbitaalka Malmö qeybtiisa foosha, nambarka taleefanka waa 0771-111888, waxaadna ka sii dalbanaysaa umulisadeyda.

Sidan ayay wax u dhacayaan

Waxaad lahaaneysaa hal umuliso ka hor, inta lagu jiro iyo foosha kadib. Umulisadaada waxay u shaqeysaa qaab koox ah oo ka kooban 4-5 umulisooyin, kulligoodna waxaad la kulmeysaa inta aad uurka leedahay.

Adiga iyo umulisadaada iyo umulisooyinka kale ee kooxda waxaad fursad u heleysaan in aad is barataan isla markaana aad xiriir wanaagsna dhistaan. Waxey taasi dhalin kartaa xasillooni iyo in aad ka qeyb qaadato dhammaan wareegtada daryeelka caafimaad.

In aad dareen wanaagsan ka hesho uurka iyo dhalmada waxey sare u qaadeysaa fursadda ah in bilow wanaagsan lagu billaabo waalidnimada. Waxey kale oo wax ka tareysaa naasnuujinta iyo caafimaadka dhimirka.

Inta lagu guda jiro

Laga billaabo isbuuca 20 ee uurka waxaa daryeelka caafimaad ku siinaya umulisada isbitaalka Skånes universitetssjukhus ee magaalada Malmö qeybtiisa foosha. Taasi waxey ka dhigan tahay:

- Booqasho uur
- Waxbarasho waalidnimo
- Wadahadal marka ay jirto baqdin foolasho ama dhalid
- Daryeel caafimaad ee fool oo waqti hore ah
- Daryeel caafimaad ee fool
- Daryeel caafimaad foosha kadib oo guriga ah
- Dib u raacid foosha kadib.

Booqashadu waxay ka dhaceysaa xarumaha daryeelka caafimaadka ee haweenka ee ku yaalla Jan Waldenströms gata 47 ee magaalada Malmö. Waxaa lagu siinayaa haddii aad rabto in guriga laguugu soo booqdo ama kulan dijitaal ah lagula yeesho. Umulisadaada marka aad rabto ayaad wici kartaa habeen iyo maalin.

Waxaa lagu dhalayaa waaxda foosha ee Malmö. Waxey noqoneynaa umulisadaada ama qof kale oo ka mid ah kooxda aad la kulantay, qofka ku daryeeli doono kuna siin caawimaad joogto ah.

Dhalidda kadib waxaa lagu siinayaa daryeelka caafimaad ee dhalidda kadib oo aad adiga iyo cunugaagaba u baahan tihiin. Waxaa laguugu casuumayaa in gurigaaga laguugu siiyo daryeel caafimaad haddii aad adiga iyo cunugaagaba aad caafimaad qabtaan markaad dhasho kadib.